



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad

Documentiga kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:10-aad

Tr:06.06.2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa:10-aad, sacada furitanka.11:55gh,sacada xiritanka.12:24gd.

Guntinta:142 xildhibaan.

Ajendaha:

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka.

2.Ansixinta Ajendaha

**3.U Codeynta Motionka Dhismaha Golaha Wakiillada Maamul Goboleedka
KMG ee jubbooyinka (jubba)**

4.Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Warbaahinta Dalka.

5.Qaybinta Xubnaha Sadex Guddi Madaxa-banaan:-

a)Guddiga Madaxa-banaan ee Adeegga Garsoorka

b)Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka

c)Guddiga Madaxa-banaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee B.J.F.Soomaaliya.

Mudane:Jeylani Nuur likar.

Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shacir.

Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada ka codsaday in ay ansixiyan ajendaha xildhibanada wey ansixiyeen Ajendaha.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay,maadama la codaynayo,Mooshinka laga keenay Dhismaha Golaha Wakiillada Maamul Go

Boleedka KMG ee jubbooyinka, waa in la soo tiriya xildhibaanada golaha fadhida.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay, xildhibaanada golaha fadhida wa 142 xildhibaan.

Codkiina sidan ayuu u dhacay.

Motionka laga keenay Baarlamaanka jubba lan inta ogol gacanta ha tagto

Inta ogol _____ 132 xildhibaan

Inta Diidan_____ 6 xildhibaan

Inta ka Aamustay _____ 4 xildhibaan

Intaa ka dib Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,wuxuu ku dhawaaqay in uu ansax yahay codkii loo qaaday Baarlamaanka Jubba lan.

Kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:10-aad, uu shir Guddoominayay Guddoomiye ku xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 12:24gd.

